

Jaartarka Adeegga Macaamiisha



PUBLIC
TRANSPORT
VICTORIA



Transdev Melbourne waxay ka shaqaysaa saddex meelodba meel shabakadda baska ee Melbourne, iyo 46 adeegyada waddooyinka magaalo-weynta (oo ay ka midka yihiin qaar waddooyinka SmartBus-ka ah) iyo wax ka badan 100 adeegyada baska dugsiyada.

Ayadoo ku leh toddoba dhiboot Melbourne, waxaan u adeegnaa xaafadaha magaalada ee galbeedka, koofur bari iyo kuwa bariga ayadoo la raacayo heshiiska lala-galay Public Transport Victoria.

Caalami ahaan, Transdev waa hogaamiyaha adduunka ee xagga shaqada adeegyada gaadiidka rakaabka. waxaan ka shaqaynaa tareenka, baska, feeriyada adeegyada tareenka ee fudud oo ka jira 20 waddan oo adduunka ah, waxaan leenahay 86,000 shaqaale ah waxaan maamulnaa 41,000 gaadiid ah.

Ballanqaadkayaga

Halkan Transdev Melbourne, adeegga macaamiisha wuxuu macnaahiisu yahay sii-odorosidda, ka-falcelinta iyo kabadinta baahiyaha iyo rajooyinka isbaddalaya ee kalyanteelkeena iyo macaamiisheena.

Safar kasta, dhaqanka macaamiil kasta, barnaamijka adeegga macaamiilka iyo kulanka tababar kasta wuxuu ku salaysan yahay dareenka in ganacsigeenu ku wareegayo macaamiilka.

Waxaanu taageeraynaa arintan anagoo mudnaanta siinayna una shaqaynayna horumarka joogtada ah oo ka jira qaybaha soo-socda:

- > Ammaanka
- > Adeegga Macaamiisha
- > Dayactirka > Tikidhada
- > Isku-hallaynta
- > Ra'yi-celinta
- > Helitaanka
- > Ixtiraamka





Waxaad ku jirtaa gacmo ammaan ah

Ammaanka macaamiisheena iyo shaqaalaha ayaa ah mudnaanteena ugu weyn

Waxaan leenahay nadaamk maaraynta ammaanka oo xoogan waxaana ku qiimaysanahay heerarka ammaanka oo caalami ah. Waxaan adeegsanaa hal-abuurka Transdev oo deegaaneed iyo mid caalamiyeed ah si aan si joogto ah ugu hoirumarino diiwaankeena waxqabadka ammaanka heerka sare ah oo hore usii-jirey.

Transdev Melbourne waxay leedahay tallaabooyinka jira si loo hubiyo ammaankaaga iyo nabadgelyada mar kasta.

- > Ku dhawaad dhammaan basaskeena waxaa ku xiran kaamirpooyinka CCTV ah, sidaas darteed waxaan kala socon karnaa sawirka dhacdo kasta ee Xaruunteena Kontaroolka Shaqo-socodsiiinta.
- > Dhammaan darawaladeena waa kuwo ku tababaran qiimaynta degdegga.
- > Shaqaaluhu waxay kaloo ku tababaran yihiin inay si gacmeed ah ay u caawiyaan macaamiisha leh dhaqdhaqaaq kooban ama iinta leh si ay si ammaan ah u-soo-fuuliyaan ama ugu-dejiyaan.



Ka-dhigidda mid nadiif ah

Baabuurteenu waxay raacaan jadwalada dayactirka iyo nadiifinta oo daran

Qaarka mid ah howlaheena dayactirka waxaa ka mid ah:

- > Dhammaan baabuurta si joogto ayaa looga nadiifiyaa (gudaha maalin kasta iyo dibadda asbuucii kasta).
- > Wixii bas ah oo leh garaafiitiga danbiyeed waa laga saarayaa adeegga si loo nadiifiyo sida ugu dhaqso badan sidii suurtagal ahba, taas oo badanaa dhacda dhammaadka shiftiga.
- > Si loo hubiyo baabuur-raac raaxo leh, waxaan si joogto ah u kormeerna kululaynta, marawaxadda, air condhishinka iyo ilayska si aan u hubino inay si sax ah u shaqaynayaan.
- > Markaan gadanayno baabuur cusub, waxaan raadsanaa kan ugu fiican xagga ammaanka, raaxada macaamiisha iyo dhaqalaynta shidaalka.



Waqtigaagu waa dahab

Waan ogsonahay in macaamiisheenu ka filayaan adeegyada gaadiidka inay noqdaan kuwo laysku hallayn karo oo waqtiga ilaaliya.

Habraacyadeena waqtiga imaanshaha oo jadwalsan, basasku waxay ku yimaadaan 59 ilbiriqsi ka hor ama waxay soo daahaan ilaa 4 daqiiqo 59 ilbiriqsi (xeerarkan waxay khuseeyaan istoobyada waaweyn oo keliya).

Qaar ka mid ah tallaabooyinkaaga si loo hubiyo inaan ka soo baxno hadafyadaas oo aan ixtiraamno waqtigeena waxaa ka mid ah:

- > Dhammaan basaskeena u xiran raadraaca GPS waxaana ku xira raadiyaha Xarunta Kontaroolka Howl-Socodsiinta, sidaas darteed waxaan ku siinaynaa macluumaadka wixii qalqal iyo dhacdooyin adeegga aan lagula-galin.
- > Waxaan si joogto ah u eeganaa qorsheyaasheena horumarinta howl-socodsiinta iyo qorsheyaasheena dayactirka si loo hubiyo in basaskeenu ay u sii-wadaan shaqada heerka ugu sarreeya.
- > Waxaan baarnaa macluumaadka safarka iyo ra'yi-celinta macaamiisha si loo muujiyo horumarinta jadwalka ee isbaddallada adeegga mustaqbalka.

Adeegyo Dheeraad ah

Waxaan siin doonaa mararka qaarkood adeegyo dheeraad ah wixii munaasabadaha cayaaraha waaweyn iyo munaasabadaha gaarka ah. Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan ka eeg transdevmelbourne.com.au or ptv.vic.gov.au.



Helitaanka Loo-dhan Yahay

Waxaan ujeednaa inaan xannibaadyada ka qaadno dadka qaba baahiyaha helitaanka gaarka ah

Waqtigan hadda ah, 96% ee basaskeena waxay leeyihiin sagxado hoose si buuxdana waa loo heli karaa. Dhammaan baabuurta cusub oo dhan oo aan soo gadano waxay leeyihiin sagxado hoose si buuxdana waa loo heli karaa. Waxaan la shaqaynaa Public Transport Victoria si aan u-muujino waddooyinka iyo istoobyada u-baahan in loo cusboonaysiiyo si loo hagaajiyo helidda.

Ayadoo dhammaan basaskeenu lagu fuuli karo wheelchairo, haddii ay dhibaatooyin kaa haystaan fuulidda baska fadlan nagala soo xiriir ugu yaraan 24 saac ka hor taleefanka **1800 718 121** waxaana isku dayi doonaa inaan kuu qorshayno bas sagxad-hoose leh.

Tilmaamaha Caawimnaadda Dhaqdhaqaaqa

Si aad si ammaan ah ugu safarto adeegeena, caawiyeyaasha dhaqdhaqaaqa (wheelchairada, iskuutarada ama baabuurta matoorka leh) waa inay:

- > Ku-habboonaadaan booska 1300mm (dherarka) iyo 800mm (ballaca).
- > Aysan ka badan 750mm ballac iyo inuu ka sarreeyo dhulka dherarka 300mm si uu u-gali karo agsallada taayirka baska.

Intaas waxaa dheer, isugaynta miisaanka macaamiisha, caawiyahooda (haddii uu jiro) iyo caawiyaha dhaqdhaqaaqooda waa inay ka yar yihiin 300kg. taas waa in la hubiyo inaysan ka badan qaadida miisaanka ugu sarreeya ee qalabyada fuulidda sida raambiyada.

Tababarka Bulshada

Si loo hagaajiyo ammaanka iyo kalsoonida adeegeena, Transdev waxay awoodaa si ay u siiso fuulid baabuurteena taagan dhibootyadeena si macaamiishu ugu tababaran la-haayeen fuulidda iyo ka-degidda.

Si aad u-buugaraysato booqasho, koox bulsho ah ama haya'd, fadlan email u dir melbourne@transdev.com.au ama wac **1800 718 121**.

Rarista waxyaalaha iyo boorsooyinka

Baraamyada, istaroolarada, pushchairada iyo jiiibyada dukaamaysiga waa lagu soo-dhaweynayaa basaskeena ayagoo lacag la'aan ah mar kasta. Si kastaba ha ahaatee, sababtoo ah xannibaadda booska ma ogolaan karno baaskiilada (baaskiilada laysku laabi karo waa OK hase ahaatee fadlan isku day inaad ka dheeraato inaad soo-wadato waqtiyada biigga ah). Waxyaalaha balbalaaran sida surfboorada lama ogola.

Rabaayadaha

Eeyada wax-haga iyo kuwa wax-maqla iyo xayaawaanka wax-caawiya waa loo ogol yahay basaska oo dhan mar kasta waxayna raaci karaan lacag la'aan. Eeyada yaryar ama bisadaha waa lagu qaadi karaa basaskeena ayadoo ay shardi tahay in lagu sido qaadaha rabaayadda oo ku habboon.





Ku-raaxayso baabuur-raacidda

Waxaan ballan-qadaynaa inaan kaafino rajooyinka macaamiisha

Waxaan doonaynaa in macaamiisheenu helaan waayo-aragnimo habboon mar kasta oo ay ku safraan adeegeena. Taas macnaheedu waa siinta safar sahlan oo beya'd raaxo iyo nadaafad leh iyo adeeg macaamiil oo saaxiibtinimo, xirfad-aqoon leh mar kasta.

Tallaabooyinka Adeegga Macaamiisha

Qaar ka mid ah tallaabooyinkayaga si loo hubiyo inaad ku raaxaysanayso raacidda waxaa ka mid ah:

- > Tababarka adeegga macaamiisha ee 'Aadidda Daryeelka' oo qasabka ah oo la siiyo dhammaan shaqaalaha oo dhan.
- > Barnaamijyada Musaafirka Daahsoon iyo hanti-dhowrka guduha ah si loo qiimeeyo waxqabadkeena.
- > Nadaamyada iyo qalabka kuwaas oo ka dhiga mid u-fudud shaqaalaheena si ay usii sheegaan wixii arimo jira kuwaas meesha ka saaraya nadaafadda iyo raaxada baabuurka.
- > Nadaamka warbixinta ra'yi-celinta macaamiisha oo ujeeddo-ahaan ku-dhisan.

Macluumaadka Macaamiisha

Waan sii wadeynaa inaan keeno nadaamyada macluumaadka macaamiisha oo hal-abuur leh si lagaaga dhigo mid si fiican u-wargashan mar kasta.

Haddadan, macaamiishu waxay heli karaan macluumaadka soo socda:

- > Jadwallada basaska Dadweynaha iyo khariidooyinka waddooyinka waxaa laga heli karaa website-ka Public Transport Victoria oo laga helayo ptv.vic.gov.au.
- > Jadwallada basaska dugsiyada iyo khariidooyinka magaalada waxaa laga heli karaa website-keena, transdevmelbourne.com.au.
- > Qalqalka adeegga waxaa lagu soo qoraa website-keena iyo kan iyo website-ka Public Transport Victoria. Waxaa kaloo layskala xiriiraa akoonka Twittarkeena iyo email/sms feejignaanta safarka (ka saxiix website-keena).



Transdev_melb



Transdev Melbourne



Adeegso tikidhkaaga

**Dhammaan rakaabka ku safraya
basaskeena waxaa looga baahan yahay inay
haystaan tikidh sax ah**

myki – tikidhkaaga aad ku safri karto

myki waa fudud yahay in adeegsado, waa kaar safar oo dib-
loo-adeegsan karo kaas oo ah tikidhkaaga aad ku safri karto
shabakadda gaadiidka dadweynaha ee Melbourne iyo qaar
tareenada gobolada iyo adeegyada basaska ee Victoria.

Si aad u-raacdo gaadiidka dadweynaha, macaamiishu waxay
u baahan yihiin inay gataan myki, tob-gareeyaan kareedhit
ahaan ayna ku taabtaan on iyo off meelaha mykiga aqriya si ay u
bixiyaan kiradooda.

Noocyada myki

- > ilmaha (da'da 4 – 16)
- > Wax-ka-dhimista
- > Kirada oo dhan
- > Waayeeladii hore

Gadashada iyo kordhinta mykigaaga

**Si aad u isticmaasho mykigaagii hore isla markiiba, waxaad
gadan kartaa oo ka tob-gareyn kartaa mykiga:**

- > Hababka PTV
- > In ka badan 800 meelaha dukaamada mykiga oo ay ka
idka yihiin dukaamada 7-Eleven
- > Xafiisyada tikidhada isteeshanada tareenka Premium-ka
- > Mashiinada mykiga oo ka furan isteeshanada tareenada
iyo taraamka premiumka iyo istoobyada basaska (keliya
iibka kaararka kirada buuxda ah)
- > Baska la-fuushan yahay (ugu baadnaan \$20 oo caddaan
keliya ah)

Haddii aad hore u-sii qorshaynayso, ka-eeg ptv.vic.gov.au ama
ka wac 1800 800 007. Sug ilaa toddoba beri in lagu soo diro
kaarka mykiga cusub iyo 24 saac tob-garayn online ah.

Taabashada on iyo off

Waa inaad ku taabataa on aqriyaha mykiga markaad socdaalka bilaabayso aadna ku taabataa off aqriyaha mykiga markaad dhammaynayso.



Fadlan la socio: Darawalka baskaaga wuu ku xasuusin doonaa inaad taabato on-ka.

Wax-ka-dhimista

Wax-ka-dhimista waxaa heli kara macaamiisha da'doodu tahay 16 ama ka yar, iyo haysteyaasha kaararka soo-socda:

- > Kaarka Daryeelka Caafimaadka oo leh cinwaanka Victoria
- > Kaarka Wax-ka-dhimista Howlgabka
- > Kaarka Wax-ka-dhimista Ardayda ee Victorian Public Transport
- > Kaarka Waayeelkii Hore ee Victoria ama Dowlad-goboleedyada dhexdooda ah
- > War Veterans / War Widows
- > Kaarka Wax-ka-dhimista Magan-galyo doonka

Fadlan la socio: Darawalka baskaaga wuxuu xaq u leeyahay inuu arko kaarkaaga wax-ka-dhimista waana inaad siisaa haddii lagaa codsado.

Baddelidda mykigaaga

Si loo baddelo myki lumay ama la xaday, kala xiriir PTV Call Centre taleefanka **1800 800 007** ama ka eeg ptv.vic.gov.au.

Fadlan la socio: si loo baddelo myki lumay ama la xaday oo uu la socdo Student Pass, fadlan u sooceli goobtii bixisay. Waxaa sidaas oo kale ah noocyada kaararka Wax-ka-dhimista Ardayda ee Victorian Public Transport.

Macluumaad dheeraad ah

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan wax-ka-dhimista, kirooyinka, lacag-celinta, dib-u-bixinta iyo baddelidda, ka eeg ptv.vic.gov.au ka wac **1800 800 007**.



Ku-dhagaysigaaga

Waxaan dhagaysanaa waxaad oranayso waxaana u adeegsanaa ra'yi-celintaada si aad qabanao wax hagaajinta

Waxaan ku dhiirigelinaa macaamiisheena inay na siiyaan ra'yicelintooda, ha ahaato mid fiican ama aan fiicnayn. Si aan u sii wadno hagaajinta adeegeena aan kuu qabano.

Qaar ka mid ah tallaabooyinkeena inaan hubino oo aan ku dhagaysanaa waxaa ka mid ah:

- > Nadaamka ra'yi-celinta macaamiisha oo ujeeddo-ahaan ku-dhisan kaas oo naga caawiya inaan raad-raacno waxaad noo sheegayso.
- > Habraacyada gudaha kaas oo hubiya maaraynta iyo dib-u-eegidda kooxaha khuseeya ra'yigaaga markaasna masuuliyadaas waxaa la qoondeeyaa si loo sameeyo hagaajinta loo baahan yahay.
- > Kulanada 'La-kulan Maamuleyaasheena' oo Joogtada ah halkaas oo macaamiishu ay haystaan fursadda ay kula hadlaan shaqaalaha muhiimka ah ayna gacan ka gaystaan hagaajinta adeegeena ayadoo loo marayo rayi-celinta.

Nala Soo-Xiriir

Taleefanka

1800 800 007

Cinwaanka

Transdev Melbourne Pty Ltd

PO Box 8021, Sumner LPO

Brunswick East VIC 3057

Website

transdevmelbourne.com.au

(webform-ka Ra'yi-celinta iyo Faallada)

If you lodge formal feedback with us, we will provide you with an initial response within seven business days.

Hantida Lunta

Waan hayn doonaa wixii hanti looga tago basaskeena (aan ka ahayn waxyaalaha cuntada ah) ilaa saddex bilood. Waqtigaas ka dib, waa la tuurayaa isla markiiba ama waxaa la siinayaa haya'daha samafalka.

Haddii aad uga tagtay walax, waxaad nagala soo xiriiri kartaa 1800 718 121 (Isniin – Jumce, 9am – 5pm).

Qareenidda Macaamiilka PTV

Haddii aadan ku qanacsanayn natiijada kayskaaga aad doonayso inaad arinta sii waddo, waxaad gayn kartaa cabashadaa Qareenka Macaamiisha ee Public Transport Victoria.

Taleefanka
1800 800 007

Email-ka
customer.advocate@ptv.vic.gov.au

Ombudsman-ka Gaadiidka Dadweynaha

Ombudsman-ka Gaadiidka Daweynaha wuxuu la-tacaalaa cabashooyinka ku saabsan gaadiidka dadweynaha ee Victoria kaas oo macaamiishu aysan ku xallin karin si toos ah howlwadeenada gaadiidka dadweynaha. Macaamiishu aan ku qanacsanayn natiijada cabashada waxay la xiriiri karaan Ombudsman-ka.

Taleefanka
1800 466 865
(8.30am – 5pm,
Mon – Fri)

Email-ka
enquiries@ptovic.com.au

Fakiska
(03) 8623 2100

Cinwaanka
Public Transport
Ombudsman
PO Box 538 Collins Street
West Melbourne VIC 3001

Taleefanka Adeegsadeyaalka TTY
1800 555 677, markaas weydiiso
1800 466 865

Website
ptovic.com.au

Travellers Aid

Travellers Aid Australia waa haya'da aan-faai'do-doon ahayn taas oo caawisa dadka socdaalaya ayadoo siisa taageero la-xiriirta socdaalka taas oo fudud, oo la-taaban karo si ay ugu socdaalaan si xor ah oo kalsooni leh, ayadoon loo eegayn asalkooda.

Taleefanka
(03) 9670 2072 (Southern Cross Station)
(03) 9610 2030 (Flinders Street Station)

Website
travellersaid.org.au



Na-caawi, Aan ku-caaawinee

Noqo mid masuula oo ixtiraama adeegyadeena

- > Hubso inaad ku socdaasho Myki pass sax ah, ama lacag myki oo kuugu filan socdaalkaaga, una diyaargarow inaad taabato markii basku yimaado.
- > Markaad ku sugayso bas istoobka, ha istaagin meel halkaas oo aad qatar ku galinayso naftaada ama tan dadka kale.
- > Gacanta utaag baska soosocda si uu darawalku u-ogaado inaad doonayso inaad baska raacdo.
- > Qabso raylka gacanta ama kursiga hore ku-yaal, maaddaama basaska looga baahan karo inay si degdeg ah bareegga u-qabtaan sababtoo gaadiidka.
- > U-sheeg darawalka baska inuu si fiican u-istaago ka-hor intuuusan gaarin meeshaad u-socotey.
- > Noqo mid ixtiraam leh oo xushmad u-haya macaamiisha kale iyo shaqaalaha Transdev Melbourne taas oo ah:
 - > Inaad dan daran muusig cod dheer ama aadan qabsan sheeko taleefanka mobaylka oo cod dheer
 - > Ka-ilaalinta cagahaaga iyo boorsooyinkaaga kuraasta
 - > Lama ogola in sigaar lagu cabbo bas istoobka ama baska dhexdiisa
- > Mar kasta kursiga sii waayeelka, macaamiish uurka leh iyo macaamiisha iinta leh
- > Iska ilaali wax ku-cunidda ama wax ku-cabidda baska dhexdiisa (khamriga waa mamnuuc) wixii qashin ahna adigu qaado.
- > Ka-hor degitaanka, fadlan hubi kursigaaga waxaadna hubisaa inaad qaadato waxyaalahaaga qiimaha leh.
- > Hubi inaad haysato taageero habboon haddii aadan si xor ah uga degi karin baska.





Wixii macluumaad dheeraad ah ka eeg
ptv.vic.gov.au or call 1800 800 007

| | |
|------------|----------|
| عربي | 普通話 |
| 廣東話 | Somali |
| Hrvatski | Español |
| Dinka | سوداني |
| Ελληνικά | Türkçe |
| Italiano | Việt-ngữ |
| Македонски | |

Information in other languages:

If you are deaf, or have a hearing or
speech impairment, contact us through
the National Relay Service:

> Taleefanka adeegsadeyaalka TTY 133 677,
ka diba weydiiso 1800 800 007

Waxaa ogolaaday Public Transport Victoria,
750 Collins Street, Docklands